

COVID-19 iyo caafimaadka iyo badbaadada shaqada - Ganacsi yar yar

Qiimaynta iyo maamulka halista

COVID-19 wuxuu beddelay habka aan dhammaanteen u nool nahay iyo u shaqeyno. Laakiin adduunka ganacsigu wuu sii jeedaa.

Qiimaynta khatarta caafimaad iyo badbaadada ee COVID-19 waa talaabo muhiim u ah ganacsiyada yaryar, si loo garto loona maamulo khataraha ku iman karta adiga, shaqaalahaaga, iyo macaamiishaada.

Markaad sameyneysid qiimeynta halista, weydii naftaada:

- Waa maxay halistu?
- Waa maxay waxyeelada ay u geysan karto qof, iyo side ayay suurto gal u tahey?
- Waa maxay heerka halistu?
- Maxaan sameyn karaa si aan u maamulo khataraha?
- Sidee khatarta loo eegi doonaa loona kormeeri doonaa, si loo hubiyo in tallaabooyinka xakamaynta ay shaqeynayaan, oo laga baadho khataro cusub?

Maamulida khatarta ayaa mid socoda ah- hubso inaad qiimeysid halista cusub ama isbeddelada ka dhacey COVID-19, sida khataraha ka yimaada gardarada macaamiisha, baahida shaqo oo korodha ama ku shaqeynta go'doominta.

Waa inaad la hadashaa shaqaalahaaga. Wadajir ayaad u garan kartaan khataraha waxaanad ka wada shaqeyn kartaan sida loo maamulayo.

Aynu wada ilaashano adduunka ganacsiga yar yar inuu sii socodo. Macluumaad dheeri ah, u jiheyso websaydhka ah - safeworkaustralia.gov.au.

Kala fogaanshaha jidhka

Khatarta soo-gaadhista 'COVID-19' way sii kordhaysaa marka lala shaqeeyo dadka kale. Meesha ay suurtagal tahay, ku dhaqan kala fogaanshaha jidhka.

Tixgeli:

- Dib-u-qaabaynta meesha shaqada.
- Qabashada shirarka ann fool ka fool aheyn
- Yareynta tirada dadka ee wadajooga meel la waadago.
- Maamul safka iyo nambarada macaamiisha.



Hadday suurtagal tahayna, u dhaaf waqtiga u dhexeeya ballamaha si aad u xaddidid is-dhexgalka jirka oo aad u hubiso in shaqaaluhu leeyihiin qalab ama qalab u gaar ah.

Wixii ku saabsan hagida-gaarka ah ee shaqadan ee ku saabsan COVID-19, waxaad u tagtaa safeworkaustralia.gov.au.

Nadiifinta goobtaada shaqada

COVID-19 wuxuu ku faafa dhibco dhibco ah oo la soo saaro marka qof cudurka qaba uu qufaco ama hindhisto.

Dadku waxay ku heli karaan COVID-19 markay taabtaan waxyaabaha dushoodu jeermis leh.

Hubso in meesha shaqo ugu yaraan maalin kasta lagu nadiifiyo saabuun iyo biyo.

Mar haddii dusha sare nadiif ay tahey, waad kadli kartaa jeermiska.

Muhiimada si nadiifadeynta sagxadaha meelaha sida badan loo taabto.

Haddii aad leedahay kiis COVID-19 shaqada, meeshada shaqada waxay u baahan doontaa in si fiican loo nadiifiyo oo jeermika laga dilo kahor intaaney dadku soo noqon.

Wixii ku saabsan hagida-gaarka ah ee ku saabsan shaqadan ee COVID-19, waxaad u tagtaa safeworkaustralia.gov.au.

Websaydka Badbaadada Australiya ee COVID-19

Safe Work Australia waxay sameysay hagiis cusub si looga caawiyo ganacsatada yaryar inay fahmaan shaqooyinkooda caafimaadka iyo badbaadada, iyo inay maamulaan khataraha ka imaan kara COVID-19.

safeworkaustralia.gov.au waxay haysaa macluumaad ku saabsan mowduucyada sida loo sameeyo qiimeynta halista, jeedinta jirka, nadaafadda, qalabka ilaalinta shaqsiyadeed, caafimaadka maskaxda, iyo nadiifinta.

U adeegso aaladda shaandhaynta tusmada si aad si fudud ugu heshid macluumaadka ku habboon meheraddaada yar iyo shaqadan, iyo sidoo kale ilaha wax ku oolka ah, sida liiska meesha shaqada iyo waraaqaha lagu dhajiyo.

Faahfaahin gaar ah oo ku saabsan shaqadan, cinwaanka tooska ah hadda ka eeg - safeworkaustralia.gov.au.